

TALLAALKA

Finland waxaa jira barnaamijidka tallaalka bulshada. hadafka laga leeyahayna waa in tallaaladaas ay sida ugu macquulsan ooga badbaadiyaan cudurada tallaalkaas loogu talagalay. Tallaaladaas awgood ayaa finland cudurada qaarkood ay aad oogu yaryihiin amaba ay ka dhammaadeen.

Xarunta daryeelka waxaa la isaga talaalaa sida cuduradan kala ah, daacuunka, qoorgooyaha, oof wareenka, cuna xanuunka, teetanada, xiiqdheerta, dabeysha, infakshinka cunaha, jadeecada, qaama-qashiirka iyo busbuska.

Carruurta waxaa lagu tallaalaa xarunta daryeelka carruurta, marka ay da`doodu tahay, 2 bilood, 3 bilood, 5 bilood, 12 bilood, (14-18 bilood), 4 sano, iyo 6 sano. Dadka aan horay loo tallaalin ama aan garanaynin in la tallaalay iyo in kale, waxaa si shaqsiyan ah loogu sameynayaa barnaamij tallaal. Warbixin dheeraad ah waxaa ka heleysaa kalkaalisada caafimaadka ee xarunta daryeelka carruurta. Tallaalka ma aha qasab, waana lacag la`aan.



Sanni Weckman / TAMK

Kahortaga daryeelka caafimaadka ee xarunta daryeelka hooyada iyo carruurta



Qoraalka: Tuija Vuolle/MAKO-mashruuca
Sawirka: Sanni Weckman/TAMK
Waxaana tarjumay xafiiska turjubaanada ee Pirkanmaa

Barnaamijka caawimidda ajaanibta ee laqabsashada waddanka daryeelka caafimaadka carruurta iyo dhalinyarada -mashruuca (MAKO)

KAHORTAGA DARYEELKA CAAFIMAADKA EE XARUNTA DARYEELKA HOoyADA IYO CARRUURTA

Kahortaga daryeelka caafimaadka u macnaahisu waa in si da oogu macquulsan ooguna dhaqsaha badan loo ogaada loogana hortagaa cudurada kala duwan iyo wax yaalaha caafimaadka dhibta u keeni kara. Xarunta daryeelka carruurta waalidku waxa uu ka heli karaa warbixino kaladuwan oo ah daryeelka iyo caawimaada ay helaan bulshada, kuwaasoo kala ah, kalkaalinta hooyada iyo wax u qabadka qoyska. Imaatinka aad imanaysid xarunta daryeelka carruurta waa lacag la`aan.

Xarunta daryeelka waxa ay la socotaa xaaladda caafimaadka hooyada iyo carruurta, waxaa kor looqaadaa caafimaadkooda iyo nolol maalmeedkooda, waxaa lakoo laxoojiyaa xiriirka qoyska. Hooyada waxa ay macmiil ka noqonaysaa xarunta ilaa seddex bilood dhalmadeeda kadib, carruurtuna waxa ay macmiil ka yihiin markay dhashaan ilaa inta ay ka bilaabayaan iskoolka. Ma aha in aad timaatix xarunta daryeelka adoo xanuunsan. Haddii aad xanuunsan tahay waa in aad aadaa xarunta caafimaadka ee xaafadda aad deggan tahay.

Wax qabadka xarunta daryeelka carruurta



Sanni Weckman/TAMK

Qofka uurka le waxa uu xarunta lasoo xiriirya badanaa marka uu uurku yahay 5-7 wiig. Marka hore badanaa 8-10ka wiig ee hore uurka waxaa baaritaanka sameeya kalkaalista caafimaadka. Markaa kadib waxa aad xarunta imanaysaa bishiiba mar ilaa inta uurku ka gaarayo 30 wiig. Kadibna waxaad imanaysaa labadii wiigba mar. Bisha oogu dambeysana waxaad imanaysaa wiigiiba mar. Baaritaanka dhaqtarku waa laba ama seddex mar inta aad uurka leedahay oodhan.

Imaanshaha aad imanaysid xarunta waxaa lala soconayaa caafimadka hooyada iyo ilmaha uurka ku jira waxaana la samaynayaa baaritaano kala duwan. Bilowga uurka waxaa lagaa qaadayaa dhiigag si loo baro, cudurada lakala qaado waxaana la ogaanayaa nooca uu dhiigaagu yahay. Inta aad uurka leedamay waxaa suurtagal ah in aad heshaa baaritaanka sawirka laga qaado makaanka iyadoo lacag la`aan ah.

Inta aad uurka leedahay waxaa la cabirayaa cadaadiska dhiigaaga, iyo culeyskaaga, borootiinka kaadida iyo sokorta. Ilmaha uurka ku jira wadnahiisa waxaa la dhageysan karaa marka uu uurku yahay 14 wiig wixii ka dambeeya. Koritaanka makaanka waxaa laga cabirayaa caloosha korkeeda wixii ka dambeeya 20 wiig ee uurka.

Wax qabadka xarunta daryeelka carruurta

Xarunta daryeelka carruurta waxa ay u adeegtaa carruurta aan gaarin iskoolka iyo qoyskooda. Xarunta daryeelka carruurta waxaa la tiigsadaa sida oogu suurta gashan ee loo xaqiijisan la haa ilma waliba caafimadkiisa, iyo waliba sidii loo horu marin lahaa daryeelka qoyska.

Xarunta daryeelka carruurta waxaa la yimaadaa qayaastii hal mar bishii, lixda bile e oogu horeysa, wixii intaa ka dambeeya 2-6dii bilood mar. Qoysku waxa uu la kulmayaa kalkaalista caafimaadka mar kasta oo ay yimaadaan, dhaqtarkana waxa ay la kulmayaan afar mar labada sanoo here ee ilmaha. Qoysku ayaga ayaa balalanta u qabanaya carruurta da`doodu u dhaxeeyso 2-6 jir, marka la doonayo in la sameeyo baaritaankii ahaa sanadlaha.

Xarunta daryeelka carruurta wax qabadkoodu waa in ay la socdaan oo ay caawiyaan awoodooda, maskaxiyan, bulshonimadoosa iyo koritaankooda iyo kobocooda. iyo in durba la ogaado hadday jiraan wax ka duwan sida caadiga ah. Xarunta daryeelka waxaa lagu baaraa sida, culayska. dhererka, wareega madaxa, aragtida, iyo maqalka, iyo in lala socdo sida ilmaha hadalkooda usoo kobcayo.